

Hawlgallada Maamulka gobolka ee caafimaadka

Detta gör landstinget

Maamulka gobolka ee caafimaadka wuxuu hogaamiyaa hawlaha daryeelka caafimaadeedka iyo bukaanka, daryeel-caafimaadeedka ilkaha, dhaqdhaqaaqa itaaldarrada iyo hawlaha caafimaadka dadwaynaha gobolka ku nool. Maamulka gobolka ee caafimaadka wuxuu dalba oona maalgeliyaa gaadiidka dadwaynaha sida baasaska, tareenada ka shaqeeyaa bartamaha degmooyinka oona kormaraan sodhinta gobollada.

Waa dhaqdhaqaaq ujeedadiisa ahayn faa'iido ka helid, waxaana lagu maamula daqliga dadwaynaha iyo kharashyada daryeel-caafimaadeedka. Mas'uuliyada Maamulka gobolka ee caafimaadka waxaa ku qeexan sharciga daryeelka caafimaadeedka iyo bukaanka: "Ujeedada daryeelka caafimaadeedka iyo bukaanka waxaa weeyaaan caafimaad wanaag iyo daryeel-caafimaadeed dhamaan dadwaynaha ka wada siman yihiin. Daryeel-caafimaadeedka waa in dadwaynaha loo siiyaa hab ixtiraam ku salaysan iyo isku haybad, fiirogaar ahna la siiyaa karaamada qofka shaqsiga ah. Qofka qaba baahida ugu wayn ee daryeelka caafimaadeedka iyo bukaanka waa in mudnaanta koowaad la siiyaa."

Aragtida mustaqbalka iyo hadefka

Qorshaha gobalka, oo ah qorshaha barlamaanka, waxaa ku qoran aragtida mustaqbalka, hadefyada aan dooneyno iyo tilaabooyinka laga qaadi doono mudada qorshaha.

Gobalka waxaa u muuqdo aragtida mustaqbalka meel sare hadefkiisa yaal: "Sannadka 2020 gobalka Västerbotten waa inuu ahaado gobalka bulshadiisa ugu caafimaad badantahay markii bulshada kale lala barbar dhigo."

Siyaasiinta waxeey go'aamiyeen afar hadef oo gobalka quseeyo:

- Caafimaad wanaagsan iyo loo wada simanyahay
- Daryeel wanaagsan iyo loo wada simanyahay
- Lala shaqeeyo shirkado leh firfircooni leh
- Shaqo bixiye la xiiseynaayo

Gobalka wuxuu u kala qeybsanyahay afar meherad oo dhammaan gobalka oo dhan laga helo: rugyada caafimadka, adeega bulshada, daryeelka ilkaha iyo isbitaalada.

Siyaasiyiin shicibku soo doortay ayaa hogaamiya

Maamulka gobolka ee caafimaadka gobolka Västerbotten waa urur hogaan siyaasadeed leh oo oo ka hawlgalaan gobolka oo idil. Guud ahaan waxaa dhaqdhaqaaqa maamula dadka gobolka ku nool iyagoo xilliga doorashada doorta siyaasiyiintooda.

Habka xildhibaanada u hogaamiyaan dhaqdhaqaaqa Maamulka gobolka ee caafimaadka wuxuu ku salaysan yahay, jiritaanka qaybsashada mas'uuliyada oo aad u qeexan, kaasoo ka dhaxeeyaa siyaasiyiinka iyo hawlwadeneyaasha. Habka mas'uuliyada loo qaybsado wuxuu ku qeexan yahay hab-maamuleedka Maamulka gobolka ee caafimaadka.

Siyaasiyiinta ayaa hogaamiya, iyagoo Maamulka gobolka ee caafimaadka u dejiya ujeedada iyagoo go'aan ka gaara jihaynta dhaqdhaqaaqa. Hogaaminta waxay ka kooban tahay maamulida dhaqaalaha iyo shuruudo kale. Qayb muhim ah waxaa weeyaan tixraaca ujeedada iyo dhaqdhaqaaqa iyo sida loo daboolo baahida

waddaniga.

Xildhibaanada Maamulka gobolka ee caafimaadka waxay ka socdaan sideed xisbi.

Socialdemokraterna 30 kursi, Moderaterna 9, Vänsterpartiet 9, Centerpartiet 6, Folkpartiet 6, Kristdemokraterna 4, Miljöpartiet 4 och Sverigedemokraterna 3 kursi.

Guddiyada siyaasadeed

Guddiyada siyaasadeed – siiba guddiyada daryeelka caafimaadeedka iyo bukaanka, guddiyada caafimaadka shicibka iyo guddiyada daryeel-caafimaadeedka koowaad iyo guddiyada caqabadda shaqo iyo baxnaaniska – waa xiriiryeyaasha muhimka ee waddaniyiinta iyo siyasiyiinta. Waxay qiimaynayaan xaalad caafimaadeedka iyo baahida daryeelka caafimaadeedka iyo bukaanka iyo daryeel-caafimaadeedka ilkaha. Waxay kaloo qiimaynayaan dareenka dadwaynaha xiriirka la leh sida baahidaas loo daboolo.

Guddiyada waxay xildhibaanada Maamulka gobolka ee caafimaadka u soo diyaariyaan horranta go'aanka xildhibaanada xiriirka la leh qorsheha Maamulka gobolka ee caafimaadka iyo qoraalada hogaminta kale. Guddiyada waxay kaloo la wada shaqeeyaan maamulka degmooyinka, ururrada bukaan-socodka iwm.

La xiriir siyaasiyiintaada

Shabakadda internetka www.vll.se waxaa laga helayaa macluumaadka halka lagala xiriirayo dadkan la soo doortay inay matalaan maamulka caafimaadka ee gobolka.

I tus warbixinta xiriirinta.

<http://www.vll.se/Startsida/politik-och-insyn/politiker>